SO



**Håkonshallen**
Hoolka Håkon



**Lepramuseet, St. Jørgens Hospital**
Matxafka Juudaanka Ee Isbataalka St. Jørgen



**Damsgård Hovedgård**
Guriga Damsgård



**Bryggens Museum**
Matxafka Bryggen



**Alvøen Hovedbygning**
Hoyga Agaasimaha Ee Alvøen



**Gamle Bergen Museum**
Matxafka Bergentii Hore



**Rosenkrantztårnet**
Munnaaradda Rosenkranz



**Hordamuseet**
Matxafka Horda



**Skolemuseet**
Matxafka Iskoolka

# Baro matxafka magaalada!

Matxafka magaalada Bergen wuxuu ka kooban yahay 9 matxaf oo ku yaalla degmada Bergen. Matxafku wuxuu leeyahay in ka badan 120 dhisme iyo shay-yaal aad u badan oo siyaalo kala duwan wax uga sheegaya taariikhda magaalada Bergen. Waxaa halkan hoose ku qoran warbixin kooban oo ku saabsan matxafyadaas kala duwan.

BYMUSEET.

Haddaba wakhtiyada furitaanka iyo borogaraamka ka eeg **bymuseet.no**
sidoo kale nagala soco Facebook iyo Instagram.

**@bymuseetibergen**



# Gamle Bergen
## Matxafka Bergentii Hore

Matxafka Bergentii hore, ee ku yaalla Sandviken, waxaad ku arki kartaa sidii ay magaaladu ahayd qarnigii 19-aad. Waddada weyn iyo agagaarkeeda waxaa la isugu geeyay guryo kala duwan oo qadiimi ah oo ah guryihii Bergen. Meeshaan kuma aysan oollin markoodii hore, laakiin waxay fikrad fiican kaa siinayaan sidii ay Bergen ahayd qarnigii 19-aad. Guryuhu xagaaga maalin walba way furan yihiin, waxaadna booqan kartaa guryo, foornooyin, farmashiye, madbacad, dukaan raashin, goobta sancada biraha iyo qaar kale. Jilayaasha guryaha joo-ga ayaa dadka uga warrama noloshii Bergen ee qarnigii 19-aad, ruwaayado gaagaaban ayaana bannaanka lagu daawan karaa.

bymuseet.no



# Håkonshallen og Rosenkranztårnet

## Hoolka Håkon Iyo Munnaaradda Rosenkranz

Qalcadda Bergenhus markaad joogto waxaad dhex socotaa qalcaddii boqorka ee xilligii dhexe [middelalderen], halkaas oo ay ku yaallaan dhismayaasha taariikhiiga ah ee hoolka Håkon iyo munnaaradda Rosenkrantz. Qalcadda Bergenhus waxay ku taallaa bartammaha dhammaadka deked-da. Irridda matxafyada laga galo waa albaab dhagax ah.

Hoolka Håkon wuxuu jiraa in ka badan 750 sano, waxaana dhisay boqor Håkon Håkonsson. Hoolka wuxuu u isticmaali jirey degaanka boqorka iyo hool xafladeed. Waagaas Bergen waxay ahayd magaalada Norway ugu weyn uguna muhiimsan.

Halkaan ayaa tusaale ahaan ahayd meeshii lagu qoray sharcigii u horreeyay ee Norway. Hoolka waxaa ilaa iyo hadda loo isticmaalaa xafladaha qaranka iyo cashooyinka reer boqorka. Hoolka Håkon wuu furan yahay maalmaha sanadka intooda badan, xataa xilliga qaboobaha. Hoolka Håkon waxaa u dhow munnaaradda Rosenkrantz. Qaybo munnaaradda ka mid ah ayaa waxaa la dhisay sanadihii 1270-meeyadii, laakiin dhawr jeer oo kale ayaa la sii dhisay. Jaran-jarooyin cariiri ah ayada oo la raacayo ayaa la fuuli karaa ilaa iyo fiiqa munnaaradda ugu sarreeya. Munnaaraddu waxay isugu jirtay hoy degaan ah iyo dhisme difaac ah, qaybta hoosana waxaa ku yaalla god xabsi ah.



# Bryggens Museum
## Matxafka Bryggen

Matxafka Bryggen waxaad ku arki kartaa sidii ay noloshu ahayd xilligii dhexe adiga oo arkaya waxyaalihii ay aarkolajiistayaashu intay qodeen ay ka heleen Dekedda iyo meelo kale oo galbeedka dalka ah. Dekedda Bergen waxay magaalo mashquul ah ahayd in ku dhow 1000 sano. 1955-tii ayaa waxaa gubtay qaybo Dekedda ka mid ah. Markaas kaddib ayaa la billaabay in dhulka la qodo, aarkolajiistayaashuna waxay heleen carro xajmi leh oo ay dhex fadhiyaan shay-yaal boqollaal kun gaaraya. Matxafka Bryggen wuxuu ka dul dhisan yahay haraagii guryihii Bergen ugu qaddiimsanaa oo la dhisay qaybtii hore ee qarnigii 12aad – haraagii guryaha iyo wayxaalihii qodista lagu helay ayaa weli qayb muhiim ah ka ah waxyaalaha joogtada loo soo bandhigo. Qodistii dhulka hoostiisa la qoday waxaa lagu ogaaday sidii ay dadka magaalada Bergen u noolaayeen xilligii dhexe. Waxaa kale oo halkan laga helay shay-yaal ka kala yimid Yurub iyo Bariga Dhexe kuwaas oo muujinaya in ay magaaladu xiriir badan oo ganacsi la lahayd qaybo badan oo dunida ka mid ah. Waxyaalihii ay heleen waxaa ka mid ahaa looxyaal badan oo ay ku qaran tahay farta runer, kuwaas oo ah loox yaryar oo ay ku qoran yihiin qoraallo sida xan iyo gabay loo tiriyay qof la aasayo. Adiga laftigaaga ayaa bandhigga isku dayi kara in aad fartaas qorto. Matxafku wuxuu ku yaallaa Dekedda, waxyaalaha halkaas yaallana waxaa iska leh Matxafka Jaamacadda.



# Lepramuseet, St. Jørgens Hospital

## Matxafka Juudaanka Ee Isbataalka St. Jørgen

Matxafka juudaanka, ee ku yaalla Marken oo ah bartammaha magaalada, isbataal ayuu ahaa ilaa iyo horraantii qarnigii 15-aad. Dhawr dab oo waaweyn ayaa magaalada qabsaday, 9-ka guri ee hadda halkaas ka taagan na waxaa la dhisay qarnigii 18-aad. Dad qaba juudaanka iyo qaar cudurro kale qaba labadaba ayaa ku jirey istabataalka St. Jørgen ilaa iyo 1946-dii. Taariikh badan oo adag ayaa meeshaan laga soo wariyey. Berigaas na qofkii uu juudaan ku dhaco wax rajo ah kama qabin in uu cudurka ka kaco. Dad badan baa fikrado khaldan ka haystay oo aan doonayn in ay xiriir la yeeshaan dadka buka. Matxafku wuxuu hadda ka warramayaa sidii ay nolosha isbataalku ahayd iyo sidii cudurka cilmibaarista loogu samayn jirey qarnigii 19-aad. Waxaa cilmibaarayaasha ka mid ahaa Gerhard Armauer Hansen. Maanta waxaa lagu xusuustaa oo uu caan ku yahay in uu 1873-dii helay bakteeriyada juudaanka keenta. Arrintan ayaa aad iyo aad muhiim ugu ahayd helitaankii sababta cudurka keenta si dadka looga daaweeyo. Cudurka juudaanka hadda waa laga ciribtirey Norway, laakiin meelo kale oo dunida ka mid ah ayuu weli dadka ku dhacaa in kasta oo hadda cudurka loo helay daawo wanaagsan. Dhismaha guud ee qaddiimka ah gadaashiisa waxaa ku yaalla beer ay ku yaallaan dhir iyo geedo daawo ah oo laga yaabo in berigii hore halkan laga isticmaali jirey.



# Skolemuseet
## Matxafka Iskoolka

Matxafka iskoolku wuxuu ku yaallaa iskoolka qaddiimka ah ee afka laatiinka ee ku yaalla waddada Lille Øvregate, kaas oo ku garab yaalla kaniisadda weyn. Dabaqa koowaad waxaad ku arkaysaa iskoolka qaddiimka ah ee afka laatiinka, dabaqa ka sarreeyana waxaad ku arkaysaa bey'addii jirtay xilligii dugsiga hoose/dhexe iyo band-hig boorar sawirro leh oo qurxan.

Iskoolka qaddiimka ah ee afka laatiinka ee Bergen waa dhismaha iskool ee Norway ugu fac weyn, kaas oo la dhisay dabkii weynaa ee magaalada qabsaday 1702-dii kaddib. Taariikhda iskoolku waxay soo billaabatay qarnigii 12-aad. Billowgii waxaa iskoolka dhigan jirey dadka doonaya in ay noqdaan wadaad masiixi ah, markii danbana carruur-ta dabaqadda sare. Qarnigii 19-aad ayay caadi noqotay in ay dadku iskool dhigtaan, dabayaqaadii qarnigii 19-aad na Norway dadka intooda badan xoogaa iskool ah ayay dhigan jireen. Matxafka iskoolku wuxuu ku tusayaa sida laga yaabo in uu u ekaa iskool-kii qaddiimka ahaa ee afka laatiinka. Iskool-ku wuxuu ka koobnaa dhawr fasal iyo hoyga maammulaha. Waxaa halkaan dhigan jirey ardayda dabaqadda sare, waxayna baran jireen maaddooyinka afka laatiinka, diinta, xisaabta iyo maaddooyinka kale ee muhiim-ka ahaa. Ardayda kuwooda ugu da'da weyn waxaa wax bari jirey maammulayaasha. Qaar badan oo ka mid ah dadkii waagaas muhiimka ka noqday Bergen ayaa iskoolka-an ka soo baxay. Waxaa dadkii halkan ka soo baxay ka mid ahaa qoraaga caanka ah ee Ludvig Holberg.

bymuseet.no



# Damsgård Hovedgård

## Guriga Damsgård

Guriga xagaaga lagu nasto ee Damsgård, oo meel fiican uga yaal Laksevåg, wuxuu furan yahay xagaaga. Wuxuu leedayay beero fiican, makhaayad yar, waana la geli karaa guriga oo waa la daawan karaa.

Guriga xagaagu wuxuu ahaa meel magaalada ka baxsan oo uu mulkiiluhu aadi jirey si uu ugu soo xafladeeyo oo ugu soo nasto. Qarnigii 18aad, waagii ay Bergen ahayd magaalada weyn ee mashquulka badan ee qaniga ah, guryaha xagaaga ee sida Damsgård oo kale ah ee miyiga ku yaalla ayaa Yurub laga jeclaa. Horraantii qarnigii 19-aad waxaa hareeraha Bergen ku yaallay guryo xagaa oo badan oo sidaan oo kale ah, laakiin Damsgård ayaa ugu fiicnaa. Guriga Damsgård waxaa la dhisay sanadihii 1770-yadii, waxaana loo dhisay sarkaalkii qaabbilsanaa saadka ciidammada [generalkrigskommisær] iyo canshuuraha furdooyinka [generaltollforvalter] ee Joachim Christian Geelmuyden. Kaddib markii uu iibsaday laftiga dabaqadda sare baron ayuu magacii u beddeshay Gyldenkrantz. 1796-dii ayaa guriga laga iibiyay adeege reer boqor Herman Didrich Janson. Qoyska reer Janson ayaana Damsgård ku noolaa ilaa iyo 1983-dii.



# Hordamuseet
## Matxafka Horda

Matxafka Horda, ee ku yaalla Stend oo u dhow Lagunen, waxaad ku arki kartaa oo wax uga baran kartaa sidii ay ahayd nolosha Nord- og Midthordland qarnigii 18-aad- iyo kii 19-aad.

Beerallayda Bergen u jiray meel ay magaalada huuri ku imaan karaan waxaa loogu yeeri jirey striler. Matxafka Horda wuxuu ka warramayaa noloshii dadkaas striler la oran jirey, farsamada gacanta iyo dhaqanka xeebaha. Matxafka Horda wuxuu ku yaallaa bey'ad aad u qurxan oo ku taalla gacanka Fana. Meel lagu dabbaasho ayaa matxafka agtiisa ku taalla. Aaggaan waxaa lagu arkayaa raad muujinaya in ay halkan dad ku noolaayeen in ka badan 10000 oo sano ka hor. Waxaa kale oo isla aaggaan ku yaalla matxaf soo bandhiga waxyaalaha la qabto marka bannaanka la joogo [friluftsmuseum] kaas oo ah mid qurxan lehna guryo la dhisay qarnigii 18-aad iyo kii 19-aad.



# Alvøen Hovedbygning
## Hoyga Agaasimaha Ee Alvøen

Alvøen warshado ayay lahayd ilaa iyo qarnigii 17-aad. Markii hore waxay ahayd warshad baaruud, kaddib na waxaa laga dhigay warshad warqadaha samaysa. Dhismaha weyn ee Alvøen, ee hadda matxafka ah, wuxuu ahaa hoyga agaasimaha. Qoyska Fasmer ayaa meeshaan iibsaday bartammihii qarnigii 18-aad, soo saarista warqadahana waxay billaabeen 1797-dii. Waxay qoysku warshadda wadeen ilaa iyo 1981-dii. Marka aad Alvøen timaaddo, waxaad arkaysaa sida uu aagga oo dhan u ahaa qayb ka mid ah dhismaha warshadda. Waxaa halkan ku yaalla degaankii shaqaalaha, dhismihii warshadda iyo hoyga weyn ee agaasimaha oo leh hoy xagaaga lagu nasto iyo beer ardaag. Dhismaha weyn wuxuu billowgii ahaa guri xagaaga lagu nasto, laakiin laga billaabo sanadihii 1830-kii wuxuu noqday hoy sanadka oo dhan la deggan yahay. Dhismaha weyn wuxuu maanta muujinayaa in ka badan 300 oo sano oo ah raadka noloshii qoyska Fasmer ee Bergen iyo Alvøen.

Bymuseet.